Asylum Advice

(Waraysiga Koowaad)
kahor

Section 2:
(Waraysiga Koowaad) kahor

2.1 Hordhaca Asylum Screening (Waraysiga Magangalyada)t

Home Office waxaa ka go'an inuu ixtiraam, sharaf iyo cadaalad kula dhaqmo ayagoo eegin da'daada, naafadaada, qowmiyaddaada, dhalashadaada, jinsiyaddaada, sinjigaaga, jihadaada galmo, diinta ama caqiidadaada.

United Kingdom Visas and Immigration (UKVI), waax ka mid ah Home Office, wuxuu qayb ka yahay Dawladda United Kingdom (UK) oo waxay mas'uul ka yihiin inay tixgeliyaan codsigaaga magangalyo iyo inay go'aamiyaan haddii aad dalkaaga ku jirtid khatar dhab ah oo dalka UK uga baahan tahay badbaado caalami ah.

Hab-socodka magangalyada wuxuu leeyahay marxalado kala duwan iyo waqtiga uu ku qaadan doono wuxuu ku xiran yahay xaaladahaaga, laakiin lagaama saari doono dalka UK intii kiiskaaga la tixgelinaayo.

Marxaladda koowaad caadi ahaan waa waraysiga koowaad oo kani waa in la qabto markii aad codsatay magangalyo.Sababta ugu wayn ee loo qabto waraysiga koowaad waxaa weeyey in lagu ogaado aqoonsigaaga iyo sida aad ku soo gashey dalka UK iyo baahida gaarka ah ee aad lahaan kartid.

Waraysiga koowaad waxaa lagaa rabaa oo kaliya inaad ka jawaabto su'aalo aasaasi ah. Waraysigaaga wayn ee magangalyada waxaa la qaban doonaa waqti dambe.Intii laga samaynaayo waraysigaaga wayn waxaa lagaa rabaa inaad macneysaan sababta aad adiga iyo qoyskaaga u rabtiin inaad magangalyo ka codsataan dalka UK, iyo sababta aad u raadinaysaan badbaadin. Hab-socodka waraysiga koowaad ee magangalyada waa in la diiwaangeliyo codsigaaga magangalyo, la qoro dhammaan faah-faahintaada shakhsiyadeed oo lagu weydiiyo faah-faahin gaaban ee ku saabsan xaaladdaada. Waxaa lagaa codsan doonaa haddii aad doorbideyso inuu ku wareysto sarkaal lab ama dheddig ah. Marxaladdaan laguma weydiin doono macluumaad qoto-dheer ee ku saabsan magangalyadada.

Fadlan ogow in la baari doono macluumaadka aad ku bixiso waraysiga wayn oo la eegi doono haddii ay isku mid yihiin macluumaadka aad ku bixsey waraysiga kowaad.

Waa inaad run sheegto mar walba aad la xiriirto Home Office. Haddii aad telefoon soo dirto si aad u samaysato ballanka lagu yimaado qaybta lagu qaabilo magangalyo-doonka si aad u lahaato waraysiga koowaad waxaa telefoonka lagaa weydiin doonaa su'alo aasaasi ah, kuwaaso aad fursad u heli doontid inaad xaqiijiso markaad timaaddo

ballankaaga. Fadlan Home Office-ka la socodsii haddii uu jiro nuglaan (vulnerabilities) ama baahida degdegta ah ee ay ku sugan yihiin dadka aad adigu mas'uulka ka tahay.

Khadka ballanka ee qaybta lagu qaabilo magangalyo-doonka waa: 0208 196 4524. saaca ow xafiska fora 9.00 sobxa ella 4.45 Jomcada 9 sobxa ella 4.30.

2.2 Waraysiga Koowaad ee Magangalyo

Haddii qaybta lagu qaabilo magangalyada aad ka sameynayso codsiga magangalyada oo aad rabtid in tiirsanayaashaada (sida lammaane, ama carruur kayar 18 jir) ay qayb ka noqdaan codsigaaga magangalyo, waa inay ku soo raacaan. Waxaad xaq u leedahay inaad tiirsane ahaan u codsato magangalyo, laakiin waxaad xittaa samayn kartaa codsi magangalyo gaar ah haddii aad qabtid macluumaad gaar ah oo aad rabtid in la tixgeliyo.

Waraysiga koowaad wuxuu ku qaadan karaa saacado badan, sidaa awgeeda waxaa fiican inaad soo qaadato wax aad cunto ama cabto haddii uu suurtogal yahay. Qaybta lagu qaabilo magangalyo-doonka wuxuu leeyahay qolol loogu talagalay in lagu waraysto qoysaska, kuwaaso leh qaybo gaar ah oo carruurta ku ciyaari karaan, wax ku sawiri karaan ama ku daawan karaan telefishin. Hase-yeeshe, waxaad rabi kartaa inaad horey u soo qaadato wax ay ku ciyaaraan ama soo wadato saaxib kaa caawiyo ilaalinta carruurtaada.

Waraysiga koowaad wuxuu uu kala baxaa qaybo kala duwan.Kuwaani waxaa ka mid ah:

- Aruurinta Macluumaadkaaga biometrikada (kani waa qaadashada farahaada iyo sawirkaaga). Macluumaadkaaga biometrikada waa la aruurin doonaa oo waxaa la gelin doonaa kaadh aqoonsi ee lagu siin doono markii la sameynaayo waraysiga koowaad. Kani waxaa lagu magacaaba Application RegistrationCard (ARC). Kani wuxuu xaqiijin doonaa inaad codsatey magangalyo oo wuxuu diiwaangelin doonaa aqoonsiga aad siidey Home Office. Haddii laguu fasaxo inaad joogto dalka UK, waxaad xaqiijinta fasaxaas joogitaanka lagugu siin doonaa kaadhka fasaxa degganaanshaga ee la siiyo dhammaan ajaaniibka xaq u leh inay ku noolaadaan oo ka shaqeeyaan dalka UK. Kaadhka degganaanshada biometrikada wuxuu xaqiijinaayaa xaaladdaada haajireed iyo shuruudaha fasaxaaga degganaanshaha dalka UK.
- Samaynta baaritaanyada aqoonsiga iyo ammaanka.
- Xaqiijinta haddii aad hoy u baahan tahay iyo inkale iyo aruurinta macluumaad si lagu taageero go'aan ka-gaarida meesha lagaa dejin doono dalka UK.
- Dhammeystirka waraysiga koowaad oo lagaa codsan doono:
    - Su'aalo aasaas ah ee khuseeya aqoonsigaaga iyo faahfaahinta qoyskaaga

- Xaqiijinta goorta lagaa rabo inaad is-warbixiso (Macluumaad dheeraad ah ka eeg qaybta warbixinta).
- Sida aad ugu soo safartey dalka UK.
- Haddii aad qabtid xaalado caafimaad.
- Bixinta war kooban oo ku saabsan sababta aad uga soo tegtay dalkaaga
- Su'aalo khuseeya haddii dembi lagugu xukumey iyo su'aalo ku saabsan nabadgalyada qaranka.
- Haddii aad rabtid in nin ama naag ku wareystaan markii la qabanaayo waraysiga wayn.
- Haddii aad guri-laawe tahay waa inaad Home Office u sheegto baahidaada qoys. Ka dib waraysigaaga, Home Office-ku wuxuu eegayaa inuu si ku-meelgaar ah kuu siiyo guri. Go'aanka waxaa saldhig ama sabab u ah waxba la'aanta (destitution). Waa inaad xafiiska Home Office u sheegto wixii xaalad caafimaad ah ee aad adiga ama tiirsanayaashiina qabtiin;
- Haddii daawada kaa dhamaatey.
- Haddii aad u baahan tahay inaad takhtar aragto.
- Haddii aad tahay dhibbane jirdil.
- Haddii mar horey ama iminka lagugu ganacsadey iyo/ama lagu dhiigmiirey.
- Haddii carruurtaada dalka UK ku qabaan waalid kale.
- Haddii carruurta ay sameynayaan imtixaanada ugu dambeeyo ee dugsiga
- Haddii aad uur leedahay.

Home Office wuxuu eegi doonaa macluumaadka aad siiso oo waxay go'aan ka gaari doonaan aagga lagaa siin doono hoy ku meelgaar ah. Hoygaan wuxuu ku yaala xarun ku meelgaar ah. Hoyga waa mid aan la xulan karin, laakiin Home Office wuxuu tixgelin doonaa xaaladdaada.

Marka codsigaaga la diiwaangeliyo waxaa go'aan laga gaari doonaa haddii lagu xiri doono iyo inkale. Haddii lagu xiro, codsigaaga waxaa la marsiin doonaa hab-socodka deg-degga ah ee dadka xiran (DFT), kaasoo loola jeedo in codsigaaga si dhaqsi ah loo go'aamin doono. Haddii lagu xiro waxaa laguu macnayn doonaa sababta. Ayadoo qayb ka ah hab-socodka DFT, waxaa lagu siin doonaa fursadda aad ku lahaato looyar bilaash ah iyo si buuxa, ayaa lagaa waraysan doonaa codsigaaga magangalyada.

Haddii arjigaaga magangalyo doonka la diido, waxaa laga yaabaa in lagu xiro ilaa lagaa tarxiilayo UK. Haddii aad naga codsato rafcaan intii aad dalka joogto, kani waxaa la qaban doonaa inta aad ka xiran tahay.

2.3 Baahida loo qabo inaad run sheegto

Waxaa suurtogal ah in lagugula taliyey in aadan Home Office u sheegin qaybo ka mid ah codsigaaga ama xataa lagugula taliyey inaad bixiso sheeko dhammanteed ka duwan. Kani wuxuu wax-yeellayn karaa kiiskaaga oo wuxuu sababi karaa in diidmo lagu siiyo. Waa lagama marmaan inaad runta sheegto.

Haddii aad samayso codsi magangalyo aan sal leheen ama magangalyo sheegasho xadgdub, oo ay ku jirto codsi si ula kac ah loola daaho ama fursad danaysi leh, waxaa suurtogal ah in laguu diido oo dalka ayaa lagaa saari karaa kadib marka codsigaaga la hawl-geliyo.Xaalado gaar ah rafcaanka waxaa la samayn karaa oo kaliya kadib markii dalka UK laga tego. Waa dembi in khiyaano ama dokumenti been abuur ah lagu taageero codsiga joogitaan ikhtiyaari ah ee dalka UK oo waa lagugu dacwayn karaa oo waxaa laguu diri karaa xabsi haddii aad sidaas sameyso.

2.4 Waxa aad ka filan kartid waraysigaaga koowaad

Waraysiga koowaad Home Office wuxuu kaa qaadi doonaa oo kaliya macluumaad aasaasi ah.Waa inay tixgeliyaan baahidaada. Waxay xittaa qiimayn doonaan sida ay u go'aamin doonaan codsigaaga. Tusaale ahaan haddii aad ka socoto dal oo aan qabin dhibaato amni, badanaa waxaa suurtogal ah in lagu xiro oo kiiskaaga si degdeg ah loo go'aamiyo (go'aanka degdegga ee qofka xiran, DFT).Haddii aad soo martey dal kale oo ammaan ah markii aad u soo safartey dalka UK oo sarkaalada laanta socdaalka dalkaas ku yaqaanaan, kiiskaaga waxaa loo gudbin karaa qaybta Home Office Third Country Unit. Kani waxaa loola jeedaa in Home Office uu sarkaalada dalkaas ka codsan karo inay tixgeliyaan codsigaaga magangalyada.Kani waxaa loola jeedaa in lagugu celin karo dalkaas. Home Office wuxuu xittaa go'aamin karaa inaad ka socoto dal leh dhibaato amni oo kiiskaaga dedejiyaan si ay si dhaqsi ah kuu siyaan aqoonsi qaxootinimo. Home Office wuxuu kuula dhaqmi doonaa si xaq iyo si furan oo wuxuu samayn doonaa oo kaliya go'aan ku salaysan sharciga khuseeya arrinta. Fadlan ogsoonow in aad xaq u leedahay in aad waydiisatid nuqul waraysigaagii bilowga ahaa (screening interview).

2.5 Turjumaanada

Turjumaan ayaa laguu heli doonaa haddii aad mid u baahato. Haddii aad ballan qabsatay, waa inuu turjumaanku horey u joogaa ballanka. Waa inaad sugto intuu turjumaanka ka imaanaayo haddii aad u isticmaaleyso adeegga ballan la'aanta iyo waraysigaaga la samaynaayo markaad timid.

Home Office ayaa bixin doono turjumaan waqtiga waraysiga haddii aad mid u baahan tahay, oo waa in turjumaanka si sax ah u turjumo waxaad sheegto sidii Home Office u helo xog buuxda ee macluumaadka aad bixiso. Waxaad waydiisan kartaa tarjume lab ama dhaddig ah haddii aad taas door bidaysid.

Turjumaanka waxaa laga rabaa in macluumaad walba aad bixiso ku haayaan si asturan.

Fadlan ogeysii sarkaalkaaga waraysiga haddii aad ka welwelsan tahay turjumaanka, tusaale ahaan haddii dhibaato ku qabtid fahamka wuxuu sheegaayo. Saamayn kuma yeelan doono sida kiiskaaga loo go'aamin doono ama natiijada kiiskaaga.

2.6 Sida cabasho loo sameeyo

Haddii aadan ku faraxsaneen adeegyada lagu siiyey ama aad darensan tahay in shaqaalaha Home Office, turjumaanada ama qof walba ee xiriir la leh Home Office kula dhaqmin si ixtiraam iyo sharaf ah, ama ka welwelsan tahay anshaxa xirfadeed, markaa waxaad samayn kartaa cabasho.Waa muhiim inaad cabashadaada sameyso sida ugu dhaqso badan dhacdada kadib.Home Office caadi ahaan ma baari doono cabasho khuseeya xaalad dhacdey in ka badan 3 bilood kahor.

Waa inaad cabashada ku sameysa si qoraal ah. Kani waxaa lagu qori karaa oo kaliya af Ingiriis ama af Welsh. Haddii aad joogtid dalka UK waa inaad kan ku soo dirto:

- Hab email: complaints@homeoffice.gsi.gov.uk. Home Office caadi ahaan si ka degdegsan ayuu kaga jawaaba cabashooyinka emailka.
- Hab boosto: UKVI, Complaints Allocation Hub, 11th Floor, Lunar House, Wellesley Road, Croydon, CR9 2BY

Waa inaad hubiso in waxyaabahaan ay ku jiraan:

- Magacaaga iyo faahfaahintaada xiriirka oo buuxa;
- Faahfaahin buuxda ee cabashada (ay ku jirto waqtiga, taariikhda iyo goobaha);
- Magacyada ama lambarka aqoonsiga shaqaalaha ama qandaraasle walba ee Home Office oo aad xiriir la yeelatey;
- Faahfaahinta wixii markhaati ah (haddii arrinta khuseeyaan);
- Nuqulada warqadaha ama xaashiyaha arrinta khuseeya;
- Lambaradaada tixraaca Home Office.
  Cabashadaada waxaa maarayn doono hal ka mid ah Home Offices Customer Service Units (CSUS).Waxay mas'uul ka noqon doonaan inay hubiyaan in cabashadaada loo xalliyo waqti iyo hab lagu qanacsan yahay. Home Office waxay

kuu soo diri doonaan warqad lagugu sheegaayo qofka qabtey cabashadaada. Waxay caadi ahaan jawaab buuxa ku siin doonaan 20 maalmood gudaheeda. Haseyeeshe, haddii cabashadaada ku andacoonayso anshax xirfadeed aad u xun waxay ku qaadan kartaa illaa 12 usbuuc sababtoo ah baaritaan madaxbannaan ayaa dhici doona. Cabashada saamayn kuma yeelan doono sida kiiskaaga loo go'aamin doono, ama saamayn xun kuma yeelan doonto natiijada kiiskaaga.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ee kan ku saabsan fadlan la xiriir: Asylum ka wac 0808 8000 640

2.7 Dokumentiyada lagaa rabo inaad geyso Asylum Intake Unit

Waa inaad hubiso in fursadda ugu horreyso aad keento dhammaan dokumentiyada aad qabtid, si aad u taageerto codsigaaga magangalyo.

Baasaboor – baasaboorkaaga iyo midka tiirsanayaashaada ee ku qoran codsigaaga magangalyo.

Dokumentiyada socdaalka – wixii tikidh ah iyo warqadaha diyaarada lagu fuulo.

Shahaadooyinka Diiwaangelinta Booliska (Police Registration Certificates) – haddii adiga ama qoyskaaga mid qabtiin.

Wixii Dokumenti Aqoonsi oo kale – sida Warqada Aqoonsiga, shahaadada dhalashada/ninkaaxa/dugsiga, kaadhadhka xubinimada iwm. Kani waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo Home Office inuu ku ogaado aqoonsigaaga iyo dhalashadaada.

Dokumentiyada caafimaadka – Home Office waxay u baahan yihiin inay ogaadaan faahfaahinta xaalad caafimaad walba aad qabtid iyo daawoyinka aad qaadato.

Caddaynta cinwaankaaga – haddii aad dalka UK ku nooleed, Home Office wuxuu kaa codsan doonaa caddaynta cinwaankaaga sida heshiiska kirada ama biilalka guriga (tusaale ahaan gaaska, korontada iwm.) oo ku qoran magacaaga iyo dhammn cinwaannadii aad ka dagtay dalka UK.
Haddii aad ku nooshahay guri qof kale leeyahay, fadlan keen warqad uu soo qorey qofka gurigaas deggan oo u ku xaqiijinaayo haddii aad joogi kartid gurigiisa, IYO dokumentiyada caddeynaya inuu asaga ku nool yahay gurigaas oo ku qoran magaciisa iyo cinwaankiisa buuxa.

Haddii aad u baahan tahay hoy ku meelgaar ah waa inaad keento wax caddaynaya sababta aanad u joogi karin meesha aad deggan tahay iyo sababta aadan adigu isu caawin karin. Home Officku waxa uu eegayaa kaalmo ama caawinaad kasta ama hanti kuu taal ama aad ku haysatid UK ama dalalka dibadda.

Haddii aad u baahan tahay hoy ku meelgaar ah waa inaad keento wax caddaynaya sababta aanad u joogi karin meesha aad deggan tahay. Home Office wuxuu kaa qaadi doonaa dokumentiyadaada rasmiga ah iyo way hayn doonaan intii laga socod-siinaayo codsigaaga maganagalyo. Waxaad codsan kartaa fotokoobiga dokumentiyadaada, sababtoo ah waxaa laguu soo celin doonaa oo kaliya kadib markii kiiskaaga la xiro.

2.8 Degaan/guri iyo Asylum Support

Markaad ku jirto waraysigaaga koowaad waxaa lagaa codsan doonaa haddii aad u baahan tahay hoy iyo taageerid. Baaritaanyo ayaa la samayn doonaa si loo eego haddii aad u qalanto taageerid. Home Office wuxuu samaynayaa baaritaan ah in aad u qalantid caawimaad laguu fidiyo.

Haddii aad u baahan tahay hoy iyo taageerid:
Haddii aad u baahan tahay hoy waa muhiim inaad dhammaan alaabtaada u qaadato waraysiga koowaad. Haddii la aqbalo in aad qabtid baahi guri isla markaana aadan haysan dhaqaale aad isku caawintid waxaa markaa si toos ah laguu dejinayaa hoy kumeel gaar ah oo 'bilow' ah ka dib waraysigaaga kowaad (screening interview). Kani wuxuu ahaan karaa meel aad uga fog meesha aad joogto. Waa inaad sarkaalka u sheegto baahi deg-deg walba aad qabtid, sababtoo ah kani wuxuu saamayn ku yeelan karaa xarunta lagu geyn doono. Kani waa hoy ku meel gaar ah iyo waxaa suurtogal ah in lagu dejin doono 21 maalmod. Hase-yeeshee, kani wuxuu ahaan karaa waqti ka dheer, wuxuu ku xiran yahay xaaladahaada shakhsiyadeed.

Waa muhiim in haddii aad is taageeri karin (masruufi karin), aad kani u caddayso Home Office. Home Office wuxuu eegi doonaa xaaladdada maaliyadeed ee dalka UK iyo dibedda labaduuba. Haddii aad haysatid dhaqaale isku caawin kartid amase aad leedahay asaxaab ama qaraabo oo iyagu guri ku dejin kara cuntana ku siin kara wuxuu markaa Home Office-ku kaa qaadanayaa in aad isku filan tahay ama is caawin kartid.

Home Office-ku wuxuu kaa doonayaa in aad u gaysid caddaymaha soo socda oo laga doonayo adiga iyo dadka aad mas'uulka ka tahay:

- Bayaanada Bangiga - in aad keentid lix bilood oo ah xisaabaadka (accounts) kaaga furan UK iyo dalalka dibedda. Waxay kaloo doonayaan in ay arkaan in ay jirto lacag Eaga gudbiyey xisaabaadka aad weli isticmaashid
- Faah-faahinta wixi hanti ah - haddii ay suurtogal kuu tahay in aad adigu is caawintid
- Macluumaadka wixii shaqo ah aad ka qabatey dalka UK - waxaa loo baahan yahay nuqul ah P45 ama warqad aad ka keentid loo shaqeeyahaaga taasoo xaqiijinaysa in ay shaqadii dhammaatay iyo wakhtigii ay dhammaatay

- Faah-faahinta dakhliga iyo sida dakhligaan loo isticmaaley - risiidyo (receipts), heshiisyo, iyo caddayn ah sidii lacagtaan loo kharaj-gareeyey
- Waxyaabo walba ee la isku qurxiyo ee qiimo leh
- Hanti dalka UK ama dibedda iyo caddayn ah in hantidaan la iibin karo - caddayn ah in tan la iibin karo
- Wixii lacag ah aad qabtid ama aad hore u iibsatay markii aad soo gashay UK iyo halka ay lacagtii jirto haddii aad weli haysatid
- Ceyr walba aad ka codsato dalka UK - caddayn ah in lagaa joojiyey ama caddayn ah tirada lacagta iyo hadba wakhtiyadii aad qadanaysey (how often this is received).

Marka aad timaaddid goobta degaanka bilowga ah, waxaa diyaar ah shaqaalaha Migrant Help si ay kuu siiyaan talo bixin madax bannaan oo bilaash ah (free) iyo macluumaad. Waxaa la diyaarinayaa ballan sida ugu dhaqsaha badan si loo dhammaystiro ama loo buuxiyo Foomka ah UK Visas & Immigration Asylum Support Form (ASF1). fadlan soo qaad dhammaan dokumentigaaga iyo caddaymaha saacidaya.

Hoyga koowaad waa nooc hostel ah iyo waxaa lagugu siin doonaa cunto iyo alaabta musqusha lagu galo. Laguma siin doono taageerid maaliyadeed markii aad ku jirtid hoyga koowaad. Qofka Scotland laga siiyo degaan ama guriga bilowga ahi isaga ayaa iska dabbiraya oo xor u ah isticmaalka guriga waxaana la siinayaa qofka £5 maalin kasta si ay ugu iibsadaan agabka lagu isticmaalo suuliga iyo cuntada

Haddii aad ku guuleysato codsigaaga taageerida waxaad u guuri doontaa hoygaaga kala-firdhinta. Kani wuxuu ku yaali karaa meel walba ee dalka UK iyo waa mid aadan xulan karin. Sidaa awgeeda waa muhiim inaad Home Office u sheegto arrimaha saamayn ku yeelan karo aaga ama nooca hoyga lagu dejin doono. Waxaa muhiim ah inaad kani samayso markaad dhammeystireyso foomka codsiga ama waxaa suurtogal ah in hoyga ku habboonayn baahidaada.

Fadlan dhammaan baahidaada kala hadal hawlwadeenka Asylum Support Application markaad soo buuxineyso codsigaaga taageerida.

Haddii aad la joogeysid saaxib intii aad ka sugeysid hoyga, taageerida maaliyadeed ma bilaaban doono ilaa aad u guurto hoygaaga waqtiga dheer.

Haddii aad la degganayd saaxiib ama qoyskaaga markaana aad u baahan tahay in aad guri ka heshid meel kale waxaa aad muhin u ah in aad Migrant Help kala xiriirtid lambarka 0808 8000 641 sida ugu dhaqsaha badan ee aadan sugin inta aad ka noqonaysid guri laawe. Haddii aad deggan tahay meel ku-meelgaar ah waxaa caadi ahaan habboon in aad halkaaga ku sugnaatid si uu Home Officku u meelmariyo arjigaaga oo kuugu raadiyo guri kugu habboon markaana u bilaabo sidii laguu wareejin

lahaa ama aad ugu guuri lahayd gobollada.

Haddii aadan u baahnayn hoy
Haddii aad la joogeyso saaxiibo ama qoys waxaad u baahan doontaa inaad muujiso caddaynta inaad halkaas joogi kartid. Haddii ay hoy kaliya kugu taageeri karaan, laakin ku siin karin taageerid kale, markaa waxaad codsan kartaa taageerid maaliyadeed (cunto kaliya).

Haddii aadan u baahnayn taageerid cunto
Haddii asxaab ama qoys ku siin karaan cunto ama qabtid dakhli hooseyo, waxaad Home Office ka codsan kartaa hoy kaliya.

Waa muhiim inaad la xiriirto Asylum Support Application UK si aad u sameyso codsiga taageerida haddii aad u baahan tahay.

Asylum Support Application UK kala xiriir - 0808 8000 641
www.asylumhelpuk.org

Haddii aad codsanayso taageerid cunto kaliya, iyo la joogeysid saaxiib, taageerida maaliyadeed ma bilaaban doono ilaa la qiimeeyo haddii aad xaq u laadahay taageerida.

Haddii aad waqti dheer joogtey dalka UK iyo aadan codsanin magangalyo sida ugu dhaqsi badan, waa laguu diidi karaa taageerida Home Office.

Haddi aadan caddayn karin inaadan heli karin hoy habboon iyo/ama alaabta loo baahan yahay si lagu noolaado (cunto, habka kululaysiga) ama wax caddeynaayo in diidmada taageerida jebinaayo xuquuqyadaada aadanaha, markaa Home Office wuxuu xaq u leeyahay inuu kuu diido taageerida.

2.9 Maxaa dhacaayo haddii aan is daryeeli karin?

Home Office ayaa qiimayn doono baahidaada markii ay dhameeyaan waraysiga koowaad. Waxay go'aamin karaan inaadan is-daryeeli karin.

Sababta waxuu ahaan karaa xannuun aad u xun, naafonimo jireed, naafonimo wax-barasho, dhibaato caafimaad maskaxeed, ama tabar-darrada duqoobida. Haddii hal ka mid ah xaaladahaan ku khuseeyo, waxaa laguu gudbin karaa adeegga bulshada waraysiga kadib si ayaga u sameyaan Qiimaynta Xannaanada Jaaliyadda (Community Care Assessment). Haddii aad qabtid baahi cad oo deg-deg ah, waxaa suurtogal ah in dawladda hoose ay mas'uul ka noqoto bixinta taageerid. Kani wuxuu ahaan karaa mid leh hoy iyo taageerid maaliyadeed.

Sababta waxuu ahaan karaa xannuun aad u xun, naafonimo jireed, naafonimo

wax-barasho, dhibaato caafimaad maskaxeed, ama tabar-darrada duqoobida. Haddii hal ka mid ah xaaladahaan ku khuseeyo, waxaa laguu gudbin karaa adeegga bulshada waraysiga kadib si ayaga u sameyaan Qiimaynta Xannaanada Jaaliyadda (Community Care Assessment). Haddii aad qabtid baahi cad oo deg-deg ah, waxaa suurtogal ah in dawladda hoose ay mas'uul ka noqoto bixinta taageerid. Kani wuxuu ahaan karaa mid leh hoy iyo taageerid maaliyadeed. Haddii aad u baahan tahay taageerid dheeraad ah laakiin aadan qabin baahi xannaano deg-deg ah, Qiimaynta Xannaanada Jaaliyadda ayaa la samayn doonaa markii lagu geeyo hoygaaga waqtiga dheer. Qiimaynta wuxuu go'aamin doonaa haddii aad u baahan tahay taageerid dheeraad ah (tusaale ahaan qalabyo).

Haddii gurigaaga uu joogo cunug leh baahi daryeel (tusaale ahaan naafonimo xun ama xannuun xun awgeeda) markaa waxaa loo baahan doonaa in dawladda hoose hubiyo haddii u bixin karo heerka saxda ah ee daryeelka intii uu Home Offiska kaaga socdo hab-socodka magangalyada. Waxaa loo baahan doonaa in gudbin loo sameeyo adeegga cunugga si loo hubiyo in taageerida saxda ah la baxsho.

Haddii aad u baahan tahay talo iyo hanuunin aad kani ku sameyso, fadlan la xiriir:

Asylum Advice UK - 0808 8000 640
www.asylumhelpuk.org

2.10 Dokumentiyada lagu siin doono waraysiga koowaad

Application Registration Card (ARC)
Waxaa lagu siin doonaa Application Registration Card (ARC). Kaadhkaan waa dokumenti muhiim ah oo muujinaayo inaad samaysey codsi magangalyo. Haddii aad heli weyso kaadhkaaga ARC waxaa lagu siin doonaa warqad caddeynaayo in cosigaaga la xareeyey (SAL).

Warqadaan waxaa ku qoranaan doono faah-faahintaada shakhsiyadeed iyo sawir iyo wuxuu caddayn doonaa inaad samaysey codsi magangalyo. waxa aad heli doontaa warqad kuu sheegaysa wakhtiga iyo meesha aad SAL-kaaga ku baddalan kartid ARC. Haddii aadan helin macluumaad ku saabsan ballantaan fadlan waxa aad wacdaa Central Events Booking Unit (CEBU) adigoo garaacaya lambarka 0300 123 2235 - khadka ama laymanku waxa ay furan yihiin Isniin ilaa Jimce 9ka iyo 30 daqiiqo ee subaxnimo ilaa 3da galabnimo.

Waa muhiim inaad baarto in faah-faahintaada ku qoran kaadhka ARC ay sax yihiin. Waa inaad hubiso in magacaada, taariikhda dhalashadaada iyo dalkaaga asalka si sax ah loo diiwaangeliyey. Waa dhib in kuwaani la beddelo markii la diiwaangeliyo.

Kaadhkaaga wuxuu xaqiijin doonaa shuruudo walba ku xiran xaaladdada. Kaadhkaaga

ARC wuxuu xaqiijin doonaa haddii laguu ogol yahay inaad shaqeyso. Haddii aadan fasax u leheen inaad shaqeyso kahor intii aadan codsanin magangalyo, laguma ogolaan doono inaad shaqeyso markii aad samayso codsiga. Kaadhkaaga waxaa ku qornaan doono in mamnuuc yahay inaad shaqeyso.

Kaadhkaaga ARC ma ahan wax caddeynaayo aqoonsigaaga, wuxuu diiwaangeliya uun aqoonsiga aad bixisey markii aad sameysey codsiga magangalyada. Waxaad u baahan doontaa kaadhkaaga ARC markaad aruurineyso taageeridaada maaliyadeed, haddii aad xaq u yeelato.

Xubin walba ee qoyska waxaa la siin doonaa kaadh ARC. Waa muhiim in kaadhkaan ku keydiso meel ammaan ah. Haddii aad tahay qof magangalyo doon ah ama mid ku guul-darraystay (failed) kana wayn da'da 18 jir isla markaana uu adiga ama dadka aad mas'uulka ka tahay idinka lumay, la xaday ama uu dhaawacmay kaarka loo yaqaan ARC, fadlan la xiriir Asylum Help oo kaa caawin doonta in lala socodsiiyo Home Office-ka. Haddii aad sharci ku leedahay UK ama aad tahay qof da' yar (minor), fadlan si toos ah Home Office-ka kala xiriir lambarka 0300 123 2235 si aad ula socod siisid kaarka lumay, la xaday ama dhaawacmay.

Haddii isticmaalka kaadhka ARC aad Post Office (Xafiiska Boostada) ku hesho taageerid usbuucle ah, waxaad u baahan doontaa inaad ogeysiiso waaxda taageerida magangalyada. Marka aad Asylum Advice UK ka wacdid lambarka 0808 8000 640 fadlan la diyaar garow macluumaadkaan. Warqad walba ee Home Office ee khuseeya hoygaaga ama taageeradaada maaliyadeed waxaad heli kartaa faah-faahinta kooxda maamulo taageeradaada. Waxay qaban-qaabin karaan in lacag deg-deg laguu soo diro intii laga qaban-qaabinaayo kaadhka ARC cusub. Waxaa dhici karta in ballan laguu dhigo goobta aad u tagtid saxiixa (your local reporting centre) si aad uga soo qaadatid ARC kaarkaaga cusub. Adiga ayaa lagaa rabaa in aad iska bixisid kharajka aad ku tagaysid ballantaan.

Haddii aad u baahan tahay talo iyo hannuunin dheeraad ah oo kani ku saabsan waxaad la xiriiri kartaa Asylum Advice UK ka wac 0808 8000 640.

Markaad hesho kaadhkaaga cusub ee ARC waxaa si joogto ah lacagtaada mar kale laguugu shubayaa ama laguugu nidaaminayaa ARC kaarkaaga.

2.11 Shuruudaha warbixinta– IS96

Waxaa suurtogal ah in lagu yiri inaad xafiiska laanta socdaalka isku warbixiso waqti gaar ah usbuuc/bil walba. Waxaa lagu siin doonaa dokumenti lagu magacaabo IS96 ee xaqiijiyo shuruudahaada warbixinta iyo kuu macnayn doono faah-faahinta khuseeya joogitaanka ku meel gaarka ah ee dalka UK. Magangalyo-doonka badankooda ee aan la xirin waxaa laga sugaayaa inay isku warbaxshaan xarunta warbixinta ama saldhig boolis.

Haddii aad tahay magangalyo-doon iyo ku nooshahay meel ka fog in ka badan seddax mayl xaruntaada warbixinta iyo hesho taageerida Home Office, markaa waxaad xaq u lahaan kartaa in lagugu caawiyo tikidhyada socdaalka si aad isku soo warbixiso. Waa inaad tegtaa dhacdadaada warbixinta koowaad adigoo sittaa caddayn inaad Home Office ka hesho taageerid. Markaa waxaa lagu siin doonaa tikidhyo aad isku soo warbixiso. Kuwaani waxaa caadi ahaan lagugu siin doonaa xarunta warbixinta. Xaaladaha badankood waxaad u baahan doontaa inaad iska bixiso gaadiidka aad ku tegto warbixinta koowaad. Kani kharashkiisa dib looma gudi doono.

Waxaad u baahan doontaa inaad tusiso IS96 iyo kaadhka ARC mar walba aad is-warbixinayso.

Haddii uusan ku taageerid Home Office waxaad codsan kartaa kitidhka socdaalka haddii ay jiraan xaalado gaar ah. Waxaad u baahan doontaa inaad sarkaalka laanta socdaalka ka codsato "Foomka Codsiga Safarka Gaarka ha" markaad is warbixiso. Waa inaad codsiga ku samaysa si qoraal ah iyo inaad keento caddayn inaadan maalgelin karin socdaalkaaga.

2.12 Ku guul-daraysiga warbixinta

Waa muhiim inaad timaado dhacdo warbixin walba. Haddii aadan is-warbixin karin markaa waa inaad la xiriirto xarunta warbixinta kahor intii la gaarin taariikhda warbixinta iyo ka codsato in la joojiyo warbixinta (lambarka ku xusan IS96). Waa inaad haysataa caddaynta codsigaaga taageerida. Tusaale ahaan haddii aadan is-warbixin karin jirro awgeed waa inaad keento caddayn caafimaad.

Haddii aad ku jirtid seddaxda bilood ugu dambeeyo ee uurka waxaad codsan kartaa in warbixinta la joojiyo ilaa cunuggaaga ka dhasho. Waa inaad xarunta warbixinta la tegto shahaadadaada hooyanimada (MAT B1). Kani waxaa laga heli karaa takhtarkaaga ama booqadlahaada caafimaad. Xarunta warbixinta waa inuu markaa dib u dhigaa warbixintaada ilaa aad cunuggaada ka dhasho. Haddii aysan suurtogal kuu ahayn in aad tagto goobta aad saxiixa u tagtid waxaa muhiim ah in aad la xiriirtid xarunta saxiixa ama aad la xiriirtid qareenkaaga oo laga yaabo in uu taas kaa saacido.

2.13 Dokumentiyada aad u baahan tahay markaad is-warbix-inayso

Markaad tegeyso xarunta warbixinta waa inaad qaadataa IS96 (Warqadda warbixinta) iyo kaadhkaaga ARC. Xarumaha warbixinta ayaa kuu casriyeyn doono kaadhkaaga ARC si ay u xaqiijiyaan inaad addeeceysid shuruudahaada warbixinta iyo fasaxa joogitaankaga dalka UK. Haddii aad ku guul-daraysato inaad is-warbixiso ama haddii aad hilmaamto kaadhkaaga, markaa kaadhkaaga wuxuu Post Office u sheegi doonaa in taageerida la

joojiyo ilaa aad la xiriirto xarunta warbixinta iyo kaadhkaaga la casriyeeyo. Post Office wuxuu ku siin doonaa resiid ku qoran koodka 4. Haddii aad ku guul-daraysato inaad is-warbixiso iyo la xiriiri wayso Home Office, markaa taageeridaada waa la hakin doonaa iyo xaalado qaarkood taageeridaada waa la joojin karaa. Waa in aad tagtaa goobta aad u tagtid saxiixa si kaarkaaga loo hagaajiyo si ay kuugu suurtowdo in ay kuu sii socoto taageerada lagu siiyo.

2.14 Talo Sharciyeed

Waa muhiim in fursaddi ugu horeysey la hadasho looyar (qareen).

Looyarka wuxuu awoodaa inuu kugu caawiyo macluumaadka hab-socodka magangalyada, wuxuu ku caawin karaa turjubaanka dokumentiyadaada iyo kuu qaban-qaabin karaa in warbixinda kale ee dheeradka ah loo diro Home Office.

Waa inaad hubisaa in looyarkaaga ku diiwaangashan yahay hal ka mid ah ururyada hoos ku qoran:

- Looyar xirfadeysan ka yahay Law Society of England and Wales.
- Looyar xirfadeysan ka yahay Law Society of Scotland.
- Looyar xirfadeysan ka yahay Law Society of Northern Ireland.
- Office of the Immigration Services Commissioner (OISC), wuxuu qabaa diiwaan ay ku qoran yihiin looyaro ah heer 2 ama heer 3. Heerka 2 ama 3 waxaa loola jeedaa in looyarka aqoon u leeyahay inuu talo ka baxsho codsigaaga magangalyo iyo wakiil ayuu ka noqon kara dhammaan arrimaha khuseeya magangalyada.
- Waa inaad looyarkaaga ka codsato ururka ay ku diiwangashan yihiin. Astaanta ururyada kor ku qoran waa inay ku yaalaan dhammaan warqadaha aad ka hesho wakiilkaaga sharciyeed. Waxaad xittaa si toosan ka baari kartaa ururka uu looyarkaaga ku diiwangashan yahay.

Free Legal Advice (Talo Sharciyeed oo Bilaash ah)
Magangalyo-doon ahaan waxaad xaq u lahaan kartaa talo sharciyeed oo bilaash ah haddii aad ka baxdo shuruudaha Legal Aid (Gargaarka Sharciga). Waxaa lagugu aqoonsan doonaa magangalo-doon waraysiga kadib. Si aad xaq u lahaato gargaarka sharciga waa inaad caddayso in dakhligaaga hooseeyo iyo in kiiskaaga leeyahay fursad dhab ah inaad ku guuleysato.

Legal Aid England and Wales
The Legal Aid ayaa maamulo Legal Aid.

Si aad u hesho looyar:

Law Society:
http://www.lawsociety.org.uk/find-a-solicitor/

Direct Gov:
https://www.gov.uk/find-a-legal-adviser

OISC – Heerka 2 / heerka 3 (Takhasuus ah):
http://oisc.homeoffice.gov.uk/how_to_find_a_regulated_immigration_adviser

Waxaad xittaa la xiriiri kartaa:

Asylum Advice UK - 0808 8000 640
www.asylumhelpuk.org

Legal Aid Scotland
The Scottish Legal Aid Board wuxuu maareeyaa Legal Aid. Macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Legal Aid waxaa laga heli karaa:
0845 122 8686

Si aad u hesho talo-bixiye sharciyeed:
Scottish Legal Aid Board:
http://www.slab.org.uk/public/solicitor-finder/#register

OISC:
http://oisc.homeoffice.gov.uk/how_to_find_a_regulated_immigration_adviser

Law Society of Scotland:
0131 226 7411 / www.lawscot.org.uk

Legal Aid in Northern Ireland
The Northern Ireland Legal Services Commission wuxuu maareeyaa Legal Aid ee Waqooyiga Ireland.

Si aad u hesho qareen:
Northern Ireland Legal Services Commission:
http://www.nilsc.org.uk/solicitors.asp?on=solicitors

Law Society of Northern Ireland:
http://www.lawsoc-ni.org/solicitors-directory/how-to-use-the-solicitors-directory

OISC:
http://oisc.homeoffice.gov.uk/how_to_find_a_regulated_immigration_adviser

Meel kasta oo aad ku sugan tahay: England, Wales, Northern Ireland ama Scotland waxaad kaloo la xiriiri kartaa:

Asylum Advice UK - 0808 8000 640
www.asylumhelpuk.org

2.15 Sida laga dacwoodo talo sharciyeed xun:

Haddii aad u malayso in lagu siiyey talo sharciyeed xun , markaa waxaad xaq u leedahay inaad cabasho sameyso. Marka horey waa inaad cabashada oo qoraal ah u dirto shirkaddaada qareenka.Waa inaad ku darto waxyaabahaan:

- Magacaada iyo faah-faahinta buuxa ee xiriirika;
- Faah-faahin buuxda ee cabashada (ay ku jirto waqtiga, taariikhda iyo goobta);
- Faah-faahinta wixii markhaati ah (haddii arrinta khuseeyaan);
- Nuqulka warqado ama xaashi arrinta khuseeyaa;
- Lambarka tixraaca kiiskaaga

Markaad goorta koowaad la kullanto looyarkaaga waa inay ku siiyaan warqada xannaanada macmiilka. Warqadaan waxay ku xaqiijinaayaan hawsha ay ku qaban doonaan iyo xittaa hab-socodkooda cabashada. Kani wuxuu xittaa kuu xaqiijin doonaa waqtiga uu ku qaadan doono baaritaanka cabashadaada.

2.16 Beddelka Xaaladaha

Waa inaad u sheegto Home Office haddii ay wax iska beddelaan xaaladahaaga iyo dadka aad mas'uulka ka tahay. Kuwaani waxaa ka mid ah:

- Beddelka magacaada.
- Helid lacag ama lagu siiyey lacag aad horey inoo sheegin.
- Helid lacag ama lagu siiyey lacag kadib markii aad wax iibisey.
- U guurto cinwaan kale.
- Guursato, kala tegtaan ama furto lammaanahaada.
- Go'aamiso inaad lammaanahaada la noolaato ama la samayso lammaananimo sharciyeysan.
- Isbitaal lagu jiifiyo.
- Adiga (ama lammaanahaada) uur yeelatiin ama cunug dhashaan.

- Carruurtaada ka baxaan dugsiga ama guriga.
- Xubinada kale ee qoyska kugu soo biiraan ama ka tagaan dalka UK.
- Qof kale ee kugu soo biiro ama ka tego hoygaaga.
- Lagu xiro.
- Shaqo bilaabid ama ka bixid.
- Uur yeelasho
- Ka baddalasho taageerada guri iyo dhaqaale lacageed iyo u baddalasho qaadasho taageero lacageed keliya ama bilcaksi (vice versa).
  Waa muhiim in aad Home Office-ka u sheegtid wixii is-beddelo ah ee xaaladdaada khuseeya sababtoo ah kuwaani waxay saamayn ku yeelan karaan taageerada aad xaq u leedahay.

Asylum Help ayaa kugu caawinaysa ogeysiinta Home Office, qaybta ama faraca taageeridda wixii is-beddel ah, la xiriir:

Asylum Support Application UK: - 0808 8000 641
www.asylumhelpuk.org

Waxaa kale oo muhiim ah in aad sidaasoo kale la socodsiisid qareenkaaga iyo/ama qaybta socdaalka ee Home Office-ka wax kasta oo iska baddala xaaladdaada.

2.17 Xannaanada Caafimaadka

Waxaad kharash la'aan xaq u leedahay xannaanada National Health Service (NHS) intii la go'aaminaayo codsigaaga ama rafcaankaaga. Haddii lagu dejiyey hoyga koowaad, waxaa laguu gudbin doonaa baaritaan caafimaad markaad hoygaaga timaado.

Haddii aadan joogin hoygaaga koowaad ama magaalo kale laguu direy, waa inaad sida ugu dhaqsi badan isku soo qortaa rugta takhtarka guud (GP), si aad u hesho xannaano caafimaad markaad u baahato. Si aad isku qorto rugta caafimaad waxaad u baahan tahay inaad siiso magacaada, taariikhda dhalashadaada, cinwaankaaga iyo lambarkaaga telefoonka, haddii aad mid qabtid. Waxaad xittaa u baahan doontaa inaad sameyso baaritaanka caafimaadka bukaanka cusub. Waxaa kaloo laga yaabaa in lagaa rabo in aad muujisid ARC kaarkaaga si loo ogaado in aad tahay magangalyo doone markaana xaq u leedahay daryeel caafimaad.

Haddii caawimaadda lagu siiyo ay waafaqsan tahay Section 95 ee Xeerka Socdaalka iyo Magangalyo doonka (Immigration and Asylum Act) waxaad helaysaa warqad ama shahaado ah foom caafimaad (health form) oo loo yaqaan shahaado HC2. Kani waxaa lagu siin karaa markaad joogto hoygaaga koowaad ama wuxuu qayb ka ahaan karaa

macluumaadka aad heli doontid 18 maalmood kadib goorta aad gaarto hoygaaga waqtiga dheer. Haddii aadan helin taageerida Home Office waa inaad hesho foomka HC1. Faah-faahinta waxaa laga heli karaa GP ama Department of Work and Pensions.

Shahaadada (certificate) HC2 waxa ay sida caadiga ah shaqaynaysaa lix bilood. Si loo cusboonaysiiyo shahaadada HC2 waxa aad u baahan tahay in aad buuxisid foom cusub oo summaddiisu tahay HC1. Kan waxa aad ka heli kartaa cinwaannada soo socda: http://www.nhsbsa.nhs.uk/HealthCosts/1128.aspx. Waxaad kaloo foomka ka heli kartaa Xafiiska Shaqada (Jobcentre), dhaqtarka ilkaha (dentist), dhaqtarka indhaha (optician) iyo Farmashiyaha (pharmacy).

Foomka HC2 wuxuu xaq kuu siin doonaa inaad hesho:

- Daawoyinka NHS (bilaash u ah dadka deggan Scotland iyo Wales).
- Daawaynta Ilkaha ee NHS (oo aan eheen kuwo la isku qurxiyo).
- Baaritaanka indhaha.
- Okiyaalo iyo okiyaalaha indhaha la dhax-geliyo (takhtarka indhaha ayaa kuu sheegi doono qiimaha ugu badan aad codsan kartid).
- Kharashka socdaalka si aad khabiir caafimaad ka hesho daawayn NHS.
- Barukada NHS iyo faashoyinka jirka taageeraa – tusaale ahaan kuwa taageero laf-dhabarka ama caloosha ama rajabeetada qalliinka kadib la gashto oo baxshey isbitaalka (bilaash u ah dadka deggan Scotland iyo Wales).

Haddii aad u malayso inaad qabtid qaaxo (TB) ama cudur kale ee la is qaadsiiyo waa inaad si deg-deg ah u tagto takhtar. Haddii gurigaaga bilowga ahi uu ku yaal Scotland cinwaanka iyo magaca dhaqtarkaaga (GP) waxaa lagu siinayaa inta aadan ka tegin degaankaaga bilowga ah. Dadka magangalyo doonka ahi Scotland waa ay ka heli karaan adeeg caafimad ilaa iyo inta ay ku sugan yihiin UK haddii uu u maqan yahay arji magangalyo doon iyo haddii kaleba.

2.18 Lacag siinta xaamilada

Lacag siin hal mar ah oo dhan £300 ayaa la siin karaa qofta dumar ah ee ummusha iyada oo ku sugan taageerada magangalyo doonka si looga caawiyo kharajka ay u galayso ilmaha dhashay. waa in ay arji qoraal ah ku codsataa muddo aan ka horrayn siddeed toddobaad ama usbuuc ka hor wakhtiga dhalashada ilmaha amka lix usbuuc ka dib dhalashada ilmaha. Waa in aad arjiga ku lifaaqdaa caddayn ah taariikhda la filayo ama la oddorosay dhalashada ilmaha (MATB1 form), ama warqadda dhalashada ilmaha oo dhan ama asal ah. Lacagtu waa qiime u dhigma £300 halkii ilmo sidaa darteed, hadii ay ilmuhu noqdaan mataano lacagta lagu siinayaa waa £600. Haddii aad qaadatid

taageerada Qaybta 4 (Section 4 support), waxa aad codsataa £250 muddo aan ka horrayn siddeed toddobaad ama usbuuc ka hor dhalashada ilmaha ama lix usbuuc ka dib dhalashada.

Dhammaan dumarka qaata taageerada magangalyo doonka (asylum support) isla markaana uur leh ama haysta ilmo ka yar da'da saddex sano waxa ay xaq u leeyihiin lacag siin dheeraad ah. £5 dheeraad ah usbuuc kasta ayuu leeyahay ilmaha ka yar hal sano. Dumarka uurka leh iyo ilmaha u dhexeeya da'da hal sano iyo saddex sano waxa ay xaq u leeyihiin £3 dheeraad ah oo siyaado ka ah taageerada caadiga ah ee lacag ahaanta loo siiyo.

2.19 Xadgudubka ka dhaca guryaha

Xadgudubka ka dhaca guryuhu waa shil ama dhacdo ku timaadda ficil handadaad ama cagajuglayn ah ama weerad ama ku xadgudub dhexmara dad qaangaar ah ama waawayn ee uu ka dhexeeyo xiriir qoys sida nin iyo xaaskiis (in a relationship together) xubnaha qoyska dhexdooda ama dad kale oo ku wada noolo ama hore ugu wada noolaa isku guri ayadoon loo fiirin jinsigooda (gender or sexuality.

Xadgudubka guryuhu waxa uu saamayn karaa ama ku dhici karaa qof kasta wakhti kasta. Ragga iyo dumarkaba waa uu saamayn karaa iyadoo aan loo eegin cidda ay la noolyihiin iyo xiriirka ka dhexeeya qofkaas. Haddii aad la nooshahay ama ku nooshahay xadgudubkaan aadna tahay dulmane ama markhaati (either as a victim or witness), waxaa muhim ah in aad ogaatid in aad u baahan tahay caawimaad. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in laga difaaco xadgudubka ka dhaca guryaha ayadoon la fiirin sharciga uu haysto ama xaaladdiisa soo galootinnimo (irrespective of their immigration status).

Xadgudubka waxa aad gaarsiin kartaa: hay'adda "the national domestic violence" oo aad 24ka sac kala xiriiri kartid khadka caawinaadda ee (0808 2000 247 – wicitaanku waa bilaash ama lacag la'aan), booliska, dhakhtarkaaga, soo booqdaha caafimaad (health visitor), hay'adda qaxootiga (refugee agency), kooxda taageerada degaanka (local support group). Waxa aad codsan kartaa in aad la hadashid qof dumar ah oo shaqaale ah ama tarjume dumar ah haddii aad sidaa dooratid. Macluumaadka aad bixisid waxa uu noqonayaa mid loo hayo si xafidan.

2.20 Laabashada Ikhtiyaariga ah

Haddii waraysiga koowaad kadib go'aamiso inaad rabtid inaad dib u laabato dalkaaga hooyo is-beddel xaaladdaada awgeeda, iyo aadan rabin inaad sii wado codsigaaga magangalyo, markaa waxaad la xiriiri karta Barnaamijka Dib u Noqoshada Ikhtiyaariga ah (voluntary return) ee la Caawiyo waxaa fuliya Home Office-ka. Macluumaad dheeraad ah ka eeg:

www.gov.uk/return-home-voluntarily
Voluntary Departures Team: 0300 004 0202

Haddii aad go'aamiso inaadan rabin inaad codsato magangalyo, iyo tahay qof sharci darro ku joogo dalka UK iyo rabtid inaad dalkaaga ku laabato, waxaa suurtogal ah inaad caawinaad ka hesho: Barnaamijka dib u noqoshada ikhtiyaariga waxaa fulisa ama ka hawlgala Home Office-ka. Wixiii macluumaad dheeraad ah waxa aad ka eegtaa:

www.gov.uk/return-home-voluntarily

Kooxda Ambabixidda Ikhtiyaariga (Voluntary Departures Team): 0300 004 0202.

2.21 Maxaa ka dib dhacayo?

Waraysiga koowaad kadib waxaa laguu qaban-qaabin doonaa waraysiga wayn.Waa muhiim inaad hesho qareen kahor intii la gaarin marxaladdaan si ay u turjumaan iyo u soo diraan wixii caddaymo ah aad qabtid kahor intii aadan yeelan waraysigaaga magangalyo. Fadlan eeg warbxinta waraysiga wayn kahor.

Cabasho ka samaynta Caawinta Magangalyada
Qof walba ee helo adeegyada Migrant Help ayaa cabasho samayn karo. Haddii aad dhibaato la kulanto qayb walba ee adeegyadeena, markaa waa inaad samaysaa waxyaabahaan: Xubin ka mid ah shaqaalaha ama mutadaawiciinta kala hadal arrinta sida ugu dhaqsi badan. Haddii cabashada si aan rasmi eheen lagu xallin waayo hab aad ku qanacdo, markaa cabashadaada waxaad ku samayn kartaa si qoraal ah, adigoo isticmaalaayo Foomka Cabashada. Kani waxaad xittaa samayn kartaa adigoo Asylum Advice UK (Talo-siin) ka wacaaya 0808 8000 640 ama foomka ka soo baxso boogga internetka: www.asylumhelpuk.org

Waxaad u baahan doontaa inaad cabashada ku toosiso maareeyaha adeegga aad rabtid inaad ka cabato. Cabashada looma baahno in lagu qoro af Ingiriis. Waxay ku qornaan karaan luqadaada oo Asylum Help ayaa turjumi doono. Maareeyaha wuxuu baari doonaa cabashada oo wuxuu bixin doonaa jawaab. Haddii aanan isla markiiba bixin karin jawaab lagu qanci karo, waxaan bixin doonnaa jawaab buuxa oo qoraal ah oo ku jiro faahfaahinta tallaaboyinka lagu saxo 10 maalmood shaqo gudaheeda.

Haddii aadan ku qanacsaneen natiijada cabashadaada, waxaad codsan kartaa in arrinta si dheeraad ah dib loo eego adigoo la xiriiraya Complaints Officer, Migrant Help, Charlton House, Dover, CT16 1AT. Haddii aanad weli ku qanacsaneen jawaabtaan, guuldarrada in la xallin waayey cabashada waa la diiwaangelin doonaa iyo waxaan kula talin doonnaa ururyada kale ee suurtogal ka ah inaad cabasho ka samayso.

Si aad u hesho macluumaad dheerad ah oo ku saabsan qayb walba fadlan la xiriir Asylum Help:

www.asylumhelpuk.org

Asylum Advice UK: 0808 8000 640

Asylum Support Application UK: 0808 8000 641